

## GOOBAHA COD BIXINTA OO DHAN

Doorashooyinka gobolka dhamaantood, tilmaamaha cod bixinta waxaa laga heli doonaa hadda goobaha codbixinta oo dhan Maalinta Doorashada iyaga oo ku qoran saddexda luqadood ee ugu badan ee aan Ingiriiska ahayn ee gobolka looga hadlo.

Hadda, luqadahaas waxay kala yihiin:

- Isbaanish
- Maang
- Soomaali

Tilmaamaha ah “*Sida loo Codeeyo*” ee saddexdan luqadood ayaa lagu dhejin doonaa goobta cod bixinta waxayna ku diyaarsan yihiin in ay isticmaalaan codbixiyayaasha marka ay codeynayaan. **Ogeysiis la turjumay oo tilmaamaya helitaanka tilmaamahaas oo saddexda luqadood ah ayaa sidoo kale lagu dhejin doonaa goobta.**

Boorar kale oo la turjumay ayaa la daabacay waxayna u diyaarsan yihiin tixraac ahaan ee goobta cod bixinta. Boorarkaas dhammaantood waxaa laga soo dejisan karaa bogga internetka ee boga boorarka codbixinta.

## ILAHA LA XIRIIRIDDA (LINKS)

### BOORARKA GOOBTA CODBIXINTA:

[www.sos.state.mn.us/election-administration-campaigns/election-administration/polling-place-posters](http://www.sos.state.mn.us/election-administration-campaigns/election-administration/polling-place-posters)

### SHAXDA DEGMOOYINKA LUUQADAHA LAGA TIRADA BADAN YAHAY:

[www.sos.state.mn.us/media/5634/language-minority-districts-tracts-precincts-languages.xlsx](http://www.sos.state.mn.us/media/5634/language-minority-districts-tracts-precincts-languages.xlsx)

### FOOMKA CODSIGA ADEEGYADA TURJUMAANKA:

[www.sos.state.mn.us/media/5633/request-for-interpretive-services.pdf](http://www.sos.state.mn.us/media/5633/request-for-interpretive-services.pdf)

## DEGMOOYINKA LOO AQOONSADAY LUUQADAHA LAGA TIRADA BADAN YAHAY

Xafiiska Xoghayaha Dawlada (Office of the Secretary of State) wuxuu kala shaqeyey Khabiirka Isbedelka Dadweynaha (Demographer) ee Gobolka in uu soo cadeeyo degmooyinka luuqadaha laga tirada badan yahay ee ay dadka boqolkiiba saddex ama in ka badan ee dadweynaha ku jira habka tirakoobka ay ku hadlaan luuqadda Ingiriisi ugu hadlaan “si aan aad u wanaagsaneyn” marka loo eego xogta tirakoobkii ugu dambaysay. **Shaxda qoraalka luqadaha laga tirada badan yahay ee degmada** waxaa ku jira jaantusyada loo qoondeeyay, luqadda (luuqadaha) qayb kasta, haddii qeyb buuxinayso heerka 3% ama 20%, iyo goobaha codeynta ee ku yaal qaybtaas.

Goobaha codeynta dhamaantood ee ku yaal degmooyinka luuqadaha laga tirada badan yahay, tilmaamaha codeynta iyo tusaaleyaasha cod bixinta waxaa loo tarjumi doonaa luqadda ugu badan ee aan Ingiriisiga ahayn ee goobaha codeynta ee ku yaal goobaha tirakoobka dhammaantood. Qoraaldaas waxaa la dhejin doonaa waxaana heli doona codbixiyayaasha tixraac ahaan marka ay dhiibanayaan codkooda.

Shuruudaha kor ku xusan waxaa siidheer, tirakoobyada halkaas oo 20% ama in ka badan oo dadka ku nool ay ugu hadlaan Ingiriisi “si aan aad u wanaagsaneyn,” toban ama in ka badan oo codbixiyeyaal ah ayaa u gudbin kara codsi xoghayaha dawladda ama hanti dhowrka degmadda si ay u helaan turjubaan goobta codbixinta jooga si uu tarjumaad ugu sameeyo codbixiyayaasha. **Foomka Codsiga Adeegyada Turjubaanka** ayaa la heli karaa si codsigaan loo sameeyo.

Haddii ay daneynayaan muwaadiniin ama hay'ado rumaysan in baahi loo qabo qoraalo tarjuman ama adeegyo tarjumaan oo ka jira deegaanka codeynta ee aan loo aqoonsan degmo leh luuqadaha laga tirada badan yahay, waxay macluumaadka siin karaan xoghayaha gobolka ama hanti-dhawrka degmada si ay u muujiyaan baahidaas. Iyada oo ku xiran dib u eegis iyo ogolaansho la sugayo, shuruudaha kor ku xusan waxay khuseyn doonaa degaanadaas codeynta.



Sawir (Scan) koodkan si aad u booqato Boga **HELITAANKA LUQADDA COD BIXIYAHA** wixii macluumaad dheeraad ah